

**Nuqulka 3 Maajo, 2020**

"waxa aan samayn karaa waxyaabo aanad samayn karin. Waxaad samayn kartaa waxyaabo aanan samayn karin. Wada jir, waxa aynu ku qaban karnaa waxyaabo wanaagsan."

Guulaystihii Nobel Peace Prize ee Mother Theresa, intii ay taageerada daal la'aanta ah waday ee caruurta iyo qoysaska, waxay ogaatay awooda wada shaqaynta. Waxa aanu doonaynaa in aanu sii wadno horumarka caafimaadka iyo badqabka reer Vermont. **-gaar ahaan dadka haysta caruurta iyo dadka dhalinyarta ah ee baahiyaha gaarka ah qaba.** Shaqaalaha CSHN ayaa ka taageeraya qoysaskeena inta Badhasaab Phil Scott, Gudoomiyaha Caafimaadka Mark Levine, iyo hogaamiyeyaasha kale ay qorshaynayaan dib u furitaanka amaanka ah ee ganacsiyada Vermont iyo adeegyada daryeelka caafimaadka.

### Qodobada Muhiimka ah

- Fadlan wakhti qaado aad ku buuxiso [survey](#) kan oo aad khibradaada la wadaagto **isku duwaha daryeelka**. Waxa aanu u adeegsan doonaa natiijooyinka xog uruurintan inay naga caawiso hormarinta nidaamyadeena.
- U tixgeli casuumadayada inaad noqoto shuraako qoys (oo laga heleyo xog uruurinta) oo aad is diiwaangeli.
- Waxa sidoo kale farxad noo ah in aanu bilawno muuqaalka **Family Spotlight**, fursad ay qoysasku ku helayaan in ay muuqdaan, la arko oo la baahiyo. Waxaad ka eegtaa qoyska Jakubiak boga 2!

### Khayraadka

**Dallada Qoyska Vermont:** Shuraakadayada Dalada Qoyska Vermont waxa ay martigelinayaan [virtual chats](#) ee qoysaska. Ka qaybqaado, dhagayso, hadal, oo waxa aad ogaataa in aanad kaligaa ahayn.

**U Qaybinta Cuntada Dadka Baahan:** Cuntooyin ayaa loo qaybin doonaa dadka u baahan inta lagu jiro bisha Maayo. Cuntada waxaa kamid noqon doona kartoonaada cuntada FEMA, oo ay la socdaan dalaga beeruhu, digaag, iyo waxyaabaha caanaha laga sameeyo. Riix [here](#) wixii jadwalka qaybinta ah.

**Codadka Qoyska:** Macluumaadka xuquuqda madaniga ah, eexda naafanimada, iyo daryeelka qoyska ku xeeran waxa dhamaan laga heli karaa Codadka Qoyska [website](#) .

### Nala Hadal

Shaqaalaha ku sugan [CSHN](#) waxaa ka go'an inay kula socodsiiyaan khayraadka iyo macluumaadka ugu danbeeya ee adeegyada ee qoyskaaga khuseyn kara. In kasta oo booqashada shakhsi ahaaneed wakhti xaadirkan la hakiyay, waxa kaliya ina kala xigaa waa taleefan ama email. Waxa aad qabataa websaytkayaga si aad u hesho [CSHN Care Coordinator](#) maxalliga ah ama nagala soo hadal 802-863-7338.

Hel macluumaadka dhamaan cusboonaysiintayada [www.healthvermont.gov/family/special-health-needs](http://www.healthvermont.gov/family/special-health-needs).

Nuqulka 3 Maajo, 2020

## Muujinta Qoyska

### Qoyska Jakubiak



Magacaygu waa Irene Jakubiak, ninkayga Chris iyo aniguna waxaan leenahay wiil 13 jir ah oo lagu magacaabo Reilly kaas oo qaba xanuun hide sidaha ah oo naadir ah. Xanuunkan waxaa loo yaqaan *KCTD7*, oo Reilly waxa uu kamid ah sideeda kiis ee ku nool Maraykanka. Waxaa caalamka oo dhan ka jira wax ka yar 30 kiis.

Inta lagu jiro wakhtigan aan caadiga ahayn ee uu jiro safmarka Covid 19, waxa aanu ka wareegnay gurigii cid walba soo galaysay ee ka baxaysay oo waxa aanu u wareegnay zoom/guri tiknoolojiyad ah.

Kahor Covid ka, waxa aanu u haynay kaaliye caafimaad ama daryeele Reilly 5-6 maalmood todobaadkii. Reilly waxa uu heli jiray daawayn sjidheed iyo, hadal oo xirfadeed laba jeer todobaadkii waxana uu lahaa dugsi shan maalmood todobaadkii. Reilly waxa u lahaa

dhamaan adeegyada guriga ku salaysan lixdii sano ee lasoo dhaafay.

Waxa aan iska badalnay aniga oo u baxaya oo qabanaya hawlaha waxana aan isku badalnay in aad onlayn ahaan ku dalbano wax kasta, oo uu ku jiro raashinku! Labada maalmood oo kasta oo fasaxa ah todobaadkii waxa aanu kaxaysanaa gaadhiga (anaka oo aan meelna u socon!) si markaa uu Reilly iyo anigu aanu guriga uga bixno. Waxa aan isku dayaa inaan ka sameeyo kooxo waalid zoom ka, laakiin waa shay adag in aad iska bedesho ahaanshaha qof bulshaawi ah oo aad isku bedesho qof aad u go'doonsan. Chris waxa uu usii shaqeeyaa Green Mountain Power. Sida aad sawiran karto, qoyskaayagu waxa uu sameeyaa wax aad u badan si uu Reilly u ilaaliyo amaankiisa marka uu Chris yimaado guriga.

Qaybta iigu adagi waa in aanan garanaynin goorta ay arrintan dhamaan doonto. Hadii ay dabaylo baraf wataadhamaanteen wayni ognahay goorta ay dhamaanayaan laakiin tan waxa aad moodaa in aanu muuqan dhamaadku.

Si aad uga muuqato *Muujinteena Qoyska*,

fadlan la xidhiidh [charlotte.safran@partner.vermont.gov](mailto:charlotte.safran@partner.vermont.gov)

